Alberta

**War** saxaafadeed

# Miisaaniyadda 2025: La jaanqaadka caqabadaha

Miisaaniyadda 2025 waxay la jaanqaadaysaa caqabadaha horyaalla Alberta iyada oo go'aammo masuuliyad leh lagu maalgelinayo mudnaanta maanta.

Si loo caawiyo reer Alberta ee la daalaa dhacaya qiimaha sarreeya ee nolasha, Miisaaniyadda 2025 waxay fulinaysaa dhimista cashuurta ee horey loo ballan qaaday, taasoo Albertans-ka ka badbaadin doonta boqolaal dollar laga bilaabo sanadkan. Heerka cusub ee cashuurta dakhliga shaqsiga ah ee siddeed boqolkiiba (8%) ayaa lagu dhaqan gelinayaa dakhliga ilaa $60,000, laba sano ka hor jadwalkii la qorsheeyay, taasoo qoysaska reer Alberta u badbaadin doonta ilaa $1,500 sanadka 2025.

Si loo daboolo baahiyaha dadka si xawli ah u koray sannadihii la soo dhaafay, Miisaaniyadda 2025 waxay sameyneysaa maalgelintii ugu badnayd abid ee daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada, iyadoo horey u wadaysa ballanqaadka dawladda Alberta ee lagu dhisayo dugsiyo iyo fasallo si degdeg ah. Miisaaniyadda waxay sii wadeysaa taageeridda dadka nugul, ilaalinta bulshooyinka iyo xuduudaha gobolka, iyo dhiirrigelinta dhaqaalaha, bulshooyinka, iyo qaybaha dhaqaale ee aan la xiriirin shidaalka iyo gaaska.

“Miisaaniyadda 2025 waa miisaaniyad xulashooyin adag balse si taxadar leh loo miisaamay, taasoo daboolaysa baahiyaha reer Alberta isla markaana ilaalinaysa faa’iidada Alberta. Waxay dhimaysaa cashuuraha, si hagar la’aan ah u taageertaa adeegyada dadweynaha, waxayna xoojinaysaa saldhigga dhaqaalaheenna si uu u adkaysto caqabadaha mustaqbalka."
*Nate Horner, Madaxweynaha Guddiga Maaliyadda iyo Wasiirka Maaliyadda.”*

Miisaaniyadda 2025 waxay qaadanaysaa aragti taxaddar leh oo ku aaddan mustaqbalka dhaqaale, iyadoo ka tarjumaysa khatarta sare ee khilaafka ganacsi ee u dhexeeya Kanada iyo Maraykanka iyo saameynta weyn ee ay ku yeelan karto dhaqaalaha Alberta. Aragtiyahani waxay saadaalinaysaa khilaaf ganacsi oo dhexdhexaad ah, halkaasoo Kanada ay la kulmi doonto celcelis ahaan 15 boqolkiiba cashuur xagga badeecadaha oo dhan, halka badeecadaha tamarta ay wajihi doonaan cashuur dhan 10 boqolkiiba. Alberta waxay sii wadi doontaa la shaqeynta la-hawlgalayaasheeda federaalka, gobollada iyo dhulalka si loo helo xalal. Inkasta oo cashuuraha la saaray, gobolka wuxuu filayaa in koritaanka wax-soo-saarka saliidda iyo maalgashigu uu si dhexdhexaad ah u

Classification: Public

sii socdo, taasoo dhaqaalaha gobolka ka dhigi doonta mid firfircoon. Dhoofinta saliidda cayriin ee masuulka ah ee Alberta ayaa la filayaa inay sii waddo daboolista baahiyaha tamarta ee muhiimka ah ee Maraykanka, halka ballaarinta dhuumaha Trans Mountain ay siin doonto awood dhoofin oo dheeraad ah soo-saarayaasha.

Maalgashiga ayaa sii socon doona mashaariic waaweyn oo hadda socda kuwaas oo kobcinaya dhismaha warshadaha, oo ay ku jiraan mashruuca Dow's Path2Zero, xarunta cusboonaysiinta hydrogen-ka ee Air Products, iyo mashruuca ballaarinta shidaalka la cusboonaysiin karo ee Imperial Oil ee Strathcona Refinery.

Suuqa guryaha ee Alberta ayaa la filayaa inuu noqdo meel ifaya oo ka mid ah dhaqaalaha, iyadoo dhiseyaasha guryuhu ay u shaqeynayaan sidii ay u dabooli lahaayeen baahiyaha bulshada sii koraysa. Hoos u dhaca xawliga koritaanka dadka ayaa caawin doona in suuqii shaqadu si tartiib tartiib ah isula jaanqaado sannadaha soo socda.

Inkasta oo gobolka uu wajahayo hubanti la'aan dhaqaale iyo isbedbedelka dakhliga, dowladda ayaa weli ka go'an inay qaadato go'aammo kharash-garayn oo xikmad leh si loo xaddido kobaca kharashyada hawlgalka kana hooseeyo kobaca dadka iyo sicir-bararka, iyadoo si waara u gaarsiinaysa barnaamijyada iyo adeegyada muhiimka ah ee ay u baahan yihiin reer Alberta iyo ganacsiyada Alberta.

## Miisaaniyadda 2025 waxay maalgelinaysaa:

- $9.9 bilyan oo loogu talagalay kharashaadka waxbarashada, koror ah 4.5% marka la barbardhigo 2024-25, si wax looga qabto kororka ardayda, loo shaqaaleysiiyo macallimiin dheeraad ah iyo shaqaalaha waxbarashada, loona taageero fasallada adag iyo ardayda baahiyaha gaarka ah leh.
- $2.6 bilyan oo loo qoondeeyay saddex sano ee soo socda dhismaha kaabayaasha waxbarashada (K-12), koror ah $505 milyan ama 23.9% marka loo eego Miisaaniyadda 2024. Maalgelintani waxay taageeri doontaa dhismaha in ka badan 200,000 boos cusub oo waxbarasho iyo kuwa dib loo casriyeeyay toddobada sano ee soo socda (ku dhawaad 90,000 afar sano ee soo socota).
- $28 bilyan oo loogu talagalay kharashaadka hawlgalka ee nidaamka daryeelka caafimaadka oo la casriyeeyay, taasoo ah koror dhan $1.4 bilyan ama 5.4%, oo ay ka mid yihiin:
    - $22.1 bilyan oo lagu hagaajinayo helitaanka adeegyada caafimaadka ee tayo leh, kor loogu qaadayo awoodda isbitaallada iyo xarumaha miyiga, fidinta qalliinada, iyo sii haynta iyo abaalmarinta xirfadlayaasha caafimaadka.

    - $1.7 bilyan oo loogu talagalay hirgelinta qaab-dhismeedka faragelinta naxariista leh iyo adeegyada Recovery Alberta.
    - $3.8 bilyan oo lagu hubinayo in dhammaan reer Alberta ay helaan dhammaan heerarka daryeelka, laga soo bilaabo hoyga daryeelka, daryeelka guriga, daryeelka bulshada, ilaa adeegyada hoyga iyo taageerada bulsho ee dhameystiran.
- $1.3 bilyan oo loogu talagalay kharashaadka hawlgalka ee Badbaadada Dadweynaha iyo Adeegyada Gurmadka, koror dhan 3.7% marka loo eego 2024-25, si loo xoojiyo shaqada Alberta Sheriffs, Adeegyada Xabsiyada, iyo maamulka gurmadka degdegga ah ee lagu ilaalinayo nabadgelyada bulshooyinka Alberta iyo xuduudda koonfureed.
-
- $1.6 bilyan, ama koror dhan 6% marka la barbar dhigo sanadkii hore, oo loogu talagalay Adeegyada Carruurta iyo Qoysaska si loo xoojiyo barnaamijyada ay ku tiirsan yihiin carruurta iyo qoysaska nugul.
-
- $6.2 bilyan, ama koror dhan 8.8% marka loo eego 2024-25, si loo taageero barnaamijyada bulshada ee asaasiga ah, oo ay ku jiraan gargaar muddada-gaaban ah si loo caawiyo dadka ay saameyn karaan cashuuraha Maraykanka iyo kororka deeqaha barnaamijyada guryeynta.
-
- $26.1 bilyan oo loo qoondeeyay Saddexda sano ee soo socda ee Qorshaha Maalgashiga ee Miisaaniyadda 2025, taasoo ah koror dhan 4.4% ama $1.1 bilyan ka badan Miisaaniyadda 2024, si wax looga qabto koboca bulshooyinka iyo in la dhiso lana horumariyo iskuullada, isbitaallada, jidadka iyo buundooyinka gobolka. Qorshahani wuxuu la filayaa inuu taageero celcelis ahaan 26,500 shaqo oo toos ah iyo 12,000 shaqo oo dadban sannad kasta ilaa 2027-28.

Gobolku wuxuu sii wadayaa dadaalka lagu dhisayo Sanduuqa Dhaxalka (Heritage Fund) si loo gaarsiiyo $250 bilyan marka la gaaro 2050. Sanduuqa ayaa lagu qiimeeyay $25 bilyan rubucii saddexaad ee sanad-miisaaniyadeedka 2024-25, waxaana la filayaa inuu kor u kaco ilaa $27 bilyan dhammaadka sanad-miisaaniyadeedka. Sanduuqa Dhaxalka oo dib loo casriyeeyay, kaas oo sannad kasta faa'iido dhalinaya, wuxuu xaqiijin doonaa mustaqbal barwaaqo leh oo adkeysi u leh Alberta jiilasha soo socda, wuxuuna hoos u dhigi doonaa ku tiirsanaanta gobolka ee dakhliga kheyraadka dabiiciga ah. Guddi madax-bannaan oo kormeera iyo shirkad cusub oo loo yaqaan Heritage Fund Opportunities Corporation ayaa furi doona fursado cusub iyo iskaashi caalami ah oo lala yeelanayo sanduuqyada maalgelinta qaran ee adduunka.

## Dakhli

- Wadarta dakhliga ee 2025-26 waxaa la saadaalinayaa inuu noqdo $74.1 bilyan, taasoo hoos u dhac ah $6.6 bilyan marka loo eego saadaasha 2024-25 ee $80.7 bilyan. Dakhliga guud ayaa la filayaa inuu gaaro $77.4 bilyan sanadka 2026-27 iyo $80 bilyan sanadka 2027-28, iyada oo ay hoggaaminayso koritaanka ballaaran ee dakhliga, gaar ahaan canshuuraha dakhliga.
    - Hoos u dhaca 2025-26 wuxuu inta badan ka yimaadaa $4.4 bilyan oo dhimis ah dakhliga kheyraadka aan dib loo cusboonaysiin karin, taasoo ay keentay hoos u dhac la filayo oo ku yimaada qiimaha saliidda. Dakhliga laga filayo ilahaan ayaa noqon doona $17.1 bilyan 2025-26, marka loo eego saadaasha $21.5 bilyan ee 2024-25.
    - Dakhliga canshuurta dakhliga shaqsiga waxaa lagu qiyaasayaa inuu hoos ugu dhaco $15.5 bilyan sanadka 2025-26, laga soo bilaabo $16.1 bilyan rubucii saddexaad, sababtoo ah saameynta bracket-ka cusub ee siddeed boqolkiiba (8%) ee cashuurta dakhliga shaqsiga iyo cawaaqibka xun ee la xiriira suurtagalnimada cashuuraha ganacsiga ee Maraykanka. Laakiin waxaa la filayaa in dakhliga canshuurta dakhliga shaqsiga uu si dhexdhexaad ah u koro labada sano ee xiga iyadoo dad badan u soo guurayaan Alberta.
    - Dakhliga canshuurta shirkadaha waxaa lagu qiyaasayaa $6.8 bilyan sanadka 2025-26, taasoo ah hoos u dhac dhan $586 milyan marka loo eego saadaasha rubucii saddexaad ee 2024-25, laakiin waxaa la filayaa inuu sare u kaco labada sano ee soo socda.

## Kharashyada

- Wadarta kharashka la filayo sanadka 2025-26 waa $79.3 bilyan, taasoo sare u kacay $4.4 bilyan ama 5.9% marka loo eego saadaasha saddexaad ee Miisaaniyadda 2024-25.
    - Kharashka guud ayaa la filayaa inuu noqdo $79.8 bilyan sanadka 2026-27 iyo $82 bilyan sanadka 2027-28, taasoo macnaheedu yahay koror celcelis ahaan 1.7% sanadkiiba.
- Kharashka hawlgalka (Operating expense) wuxuu gaari doonaa $64.3 bilyan sanadka 2025-26, taasoo ah koror dhan $2.2 bilyan ama 3.6% marka la barbar dhigo saadaasha Miisaaniyadda 2024-25.
    - Kharashka hawlgalka wuxuu gaari doonaa $64.8 bilyan sanadka 2026-27 iyo $66.5 bilyan sanadka 2027-28, celcelis ahaan koror ah 1.7% sanadkiiba.

- Miisaaniyadda waxay leedahay qorshe keyd ah oo dhan $4 bilyan si loo siiyo dawladda awood dheeraad ah oo wax looga qabto waxyeellooyinka dhaqaale ee lama filaanka ah iyo kharashaadka gorgortanka mushaaraadka ee socda.

## Cajsiga

- Khasnadda (deficit) la saadaaliyay ee 2025-26 waa $5.2 bilyan.
- Waxaa la filayaa in khasnadda ay hoos ugu dhacdo $2.4 bilyan sanadka 2026-27 iyo $2 bilyan sanadka 2027-28.
- Qaab-dhismeedka maaliyadeed ee dawladda wuxuu ogolaanayaa xaalado gaar ah oo ay suurtagal tahay in khasnado la galo, sida marka uu jiro hoos u dhac weyn oo dakhliga ah.
- Khasnaddan badanaa waxay sabab u tahay hoos u dhaca dakhliga laga helo kheyraadka dabiiciga ah iyo kororka kharashaadka lagama maarmaanka ah ee lagu bixiyo adeegyada muhiimka ah ee reer Alberta.

## Deynta

- Kharashaadka adeegga daynta (Debt servicing costs) waxaa la filayaa inuu hoos u dhaco $231 milyan sanadka 2025-26 marka la barbardhigo saadaasha Miisaaniyadda 2024-25, taasoo gaareysa $3 bilyan lacag horay loo amaahday sanadka 2024-25 ayaa loo adeegsan doonaa in lagu bixiyo deymaha waaweyn ee la filayo inay dhamaadaan bilowga 2025-26.

## Saadaasha Dhaqaalaha

- Sanadka 2025, wax-soo-saarka guud ee Alberta (GDP) waxaa la filayaa inuu gaabiyo oo noqdo 1.8%, kadibna hoos ugu dhaco 1.7% sanadka 2026.

- Kororka dadka ayaa la filayaa inuu gaadho 2.5% sanadka 2025, taasoo hoos uga dhacay kobocii rikoodhka ahaa ee 4.4% sanadka 2024. Kobaca dadka ayaa la filayaa inuu sii yaraado oo noqdo 1.4% sanadaha soo socda, kadibna 1.6% sanadka 2028.

## Saadaasha Tamarta & Dhaqaalaha, 2025-26

| | |
|---|---|
| Qiimaha saliidda West Texas Intermediate (USD/bbl) | $68 |
| Qiimaha Western Canadian Select @ Hardisty (CND/bbl) | $73.10 |
| Farqiga qiimaha saliidda fudud iyo mida culus (USD/bbl) | $17.10 |
| Qiimaha gaaska dabiiciga ah ee ARP (CND/GJ) | $2.50 |
| Soo saarista saliidda caadiga ah (000s barmiil/maalintii) | 519 |
| Soo saarista shidaalka ceeriin ee bitumen (000s barmiil/maalintii) | 3,558 |
| Heerka sarrifka dollarka Kanada (USD¢/CAD$) | 69.60 |
| Heerka dulsaarka bonds-ka 10-ka sano ee Canada (%) | 3.10 |

## Xogta la xariirta

- Miisaaniyadda 2025 (Budget 2025)

## Wararka la xariirira

- Miisaaniyadda 2025: Maalgelinta Mustaqbalka Alberta (Budget 2025: Investing in Alberta's future (Feb 27, 2025)
- Miisaaniyadda 2025: La tacaalidda caqabadaha caafimaadka iyo waxbarashada (Budget 2025: Meeting the challenge in health and education (Feb 27, 2025)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo khudbadda Miisaaniyadda (Watch the Budget address)
- Daawo shir jaraa'idka (Watch the news conference)
- Dhageyso shir jaraa'idka (Listen to the news conference)